

# SHAQAALAYAASHA DARUURIGA AH. XANAANADA CARUURTA XAALADAHA DAG DAGGA Ah

## LOOGU TALA GALAY SHAQAALAHA DARUURIGA AH

Matahay shaqaale daruuri ah oo dagan ama ka shaqeeya dagmada king county, SIDOO KALE ma ubaahan tahay xanaano caruur si aad u awoodo inaad uqabato shaqadaada? Haddii ay jawaabta tahay HAA , degamada King County wexey halkaan u jooqta inay kaa caawiso sidii aad kuheli lahayd daryeel caafimad xagga caruurta oo dag dag ah oo bilaash ah.

### Waxaad u baahan doonta inaad bixiso macluumadkan

- Biilasha kale ama laysinka darawalka .
- Heshiiska kirada ama wakaalada guryaha.

### SAXIIXA SHAQADA

Koobiga waa inuu kujiro magaca shaqaalaha, iyo loo shaqeeyaha iyo ciwaanka gurigiisa, iyo goobta shaqada.

### U gudbi hal kamid ah liistigaan

- Calaamad aqoonsiga shaqada ah
- Limeel kusoo dir ciwaanka shaqada oo leh magaca iyo macluumadka lagaala soo xiriirayo iyo saxeexa.
- Kaar ganacsiyeed.
- Jadwalka shaqada oo loo shaqeeyaha la arki karo.

### SAXIIXA CIWAANKA:

( Waxaa loo baahan yahay haddii aad ka shaqeeyso magaalada seattle ama meel kabaxsan King County)

### U gudbi hal kamid ah liistigaan

- Biilka xaafadda (gaska, bixiyaha, qashinka , nalka , koronta , kaybalka , biilka taleefanka )
  - Caymiska guriga\ kirada
  - Dukumeentiga amaahda
- OR

### U gudbi hal kamid ah liistigaan

- Dukumeenti caymas (Caafimad, gaari, iwm.)
- Dukumeentiga caysam (DSHS, SSI, waraaqda mushaarka).
- Dukumeenti maaliyeed (Cadeynta bangiga, hawlgab, cadeynta kaarka deynta).

Diiwaangelintu waa ineysan **ka badnaan saddex bilood**, oo ay kujirto magaca shaqaalaha, oo aysan noqon karin baqshado ama xiriirid shaqsiyeed. Haddii aad lahayn guri ama haddii aadan xaqiijin karin cinwaanka gurigaaga, fadlan na ogeysii waxaanna ku siin doonaa qaab kale oo xaqiijin ah.

**Waad dadajin kartaa nidaamka qaadashada iyo iswaafajinta adoo u diraya dukumiintiga xaqiijinta ee loo baahan yahay [subsidy@childcare.org](mailto:subsidy@childcare.org).**

### DADKA KUNOOL AMA KASHAQEEYA DAGMADA KING COUNTY AMA SEATTLE BANAAKEEDA:

Haddii aad xiiseyneyso inaad gasho booska daryeelka deg degga ah ee caruurta fadlan wac **KA WARQABKA DARYEELKA ILMAHA EE QOYSKA WASHINGTON Center at 1-800-446-1114** Si aad ula xiriirto shaqaalaha kugula wada xiriira taleefankan! Qaadashada kadib, Khabiir ku takhasusay kheyraadka ayaa kaala shaqeyn doona sidii uu kaagala mid noqon laha bixiyaha xanaanada cunuga u qalma ee buuxiya baahiya qoyska. Maamulka gobolka iyo lahawlgalayaasheeda ayaa si dhakhso leh u shaqeynaya, waxeyna rajeynayaan inay helaan xanaano caruur oo la helo bartamaha Abriil.

### DADKA KUNOOL AMA KA SHAQEYYA MAGAALADA SEATTLE:

Magaalada Seattle waxay qorsheyneysaa **BARNAAMIJKA DARYEELKA ILMAHA DEGDEGGA** ah oo lagu taageerayo jawaabayaasha ugu horreeya iyo shaqaalaha daruuriga ah. Hadaa tahay shaqaalo muhiim ah kunool ama kashaqeeya magaalada seattle , fadlan **Buuxi foomka dulsaarka.**